



Australian Government

Department of Health

TGA si loo siiyo dadka Australiyaanka ah kalsooni ay ku helaan tallaalka COVID-19

Tallaallada COVID-19 ayaa door weyn ka ciyaari doona la dagaallanka cudurrada faafa ee coronavirus.

Maamulka Agabka Daaweynta ee Australia (TGA) ayaa mas'uul ka ah qiimeynta iyo ansixinta tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay in lagu isticmaalo Australiya. TGA waxay tixgelinaysaa dhammaan faa'iidooyinka iyo halista tallaalka imaan kara. Hawlaha TGA ee go'aaminta amniga iyo waxtarka tallaallada waa mid adag, ballaadhan - oo madaxbannaan.

Laakiin TGA kaligeed ma shaqeyso. TGA waxay si dhaw ula shaqeysaa dhigeeda sharciyeynta adduunka. Waxay wada shaqeeyaan maalin kasta, iyadoo hubinaya inay jiraan aqoon la wadaago oo dhammaantood ka wada faa'iideysan karaan.

Go'aansiga in la ansixiyo tallaalka, TGA waxay qiimeysaa dhammaan macluumaadka sayniska iyo kiliinikada ee la heli karo. Macluumaadkan wuxuu ka yimid soosaaraha talaalka iyo cadeymo kale oo la heli karo.

Waxaan kaliya ansixin doonaa tallaalka si loo isticmaalo haddii ay ammaan tahay oo waxtar leedahay inta lagu jiro iyo ka dib tijaabooyinka caafimaad. Waa muhiim in soo-saaraha tallaalka uu muujin karo in tallaalka lagu soo saari karo qaab tayo sare leh, oo iswaafaqsan lana xakameeyo.

Haddii TGA ay oggolaato tallaalka, waad ku kalsoonaan kartaa inay ka shaqeyn doonto ka hortagga COVID-19. Tallaalku wuxuu yareyn doonaa tirada dadka sida daran u bukooda ama u dhinta fayraska.

Ansixinta ka dib, doorkeenu wuu sii socdaa. Waxaan sii wadi doonaa inaan si dhaw ula socono badbaadada talaalka iyo inaan qiimeyno tayada dufcad kasta oo Australiya ah.

Muhiimadeena ugu sareysa, TGA waxay sameyneysaa dib u eegis buuxda oo ku saabsan talaalada COVID-19 - laakiin waqti ka gaaban sida caadiga ah.

Qaabka ay Australiya ay qaadey wuxuu hubin doonaa in dadku kalsooni weyn ku qabaan talaalada. Tani waxay gaari doontaa natiijada ugu wanaagsan ee suurtoogalka ah ee caafimaadka bulshada.

Sidee ayaan ugu guuleysanay inaan si dhakhso leh ula socono habka qiimeynta ee talaalada iyadoo aan wax u dhimin heerarkeena? TGA waxay si joogto ah u aqbali jirtay xogta kuwa soo saareyaasha ah. Waxaan kala shaqeynay si aan jawaab deg deg ah ugu helno wixii su'aalo ah.

Waxaan haynaa kooxo kala duwan oo qiimeynaya qeybaha kala duwan ee gudbinta talaalka. Waxaan sidoo kale kordhinay tirada dadka ka shaqeeya dib u eegista sharciyada tallaalka iyo amniga. Kooxaheena dadaalka badan ee khubarada ah waxay ka shaqeeyeen mudadii ciidaha oo dhan.

Waxaa laga yaabaa inaad maqashay TGA oo tixgelinaysa kumanaan bog oo xog iyo macluumaad ah markii la qiimaynayo tallaalka. Maxaan si sax ah u eegaynaa?

Waxaan eegeynaa wax kasta oo ay ka mid yihiin waxtarka tallaalka ee deegaanka sheybaarka. Waxaan eegeynaa hababka warshadeynda. Waxaan eegnaa fijaannada wax soo saarka ee tagaya xarumaha dhakhaatiirta iyo cusbitaalada, iyo sidoo kale xogta tijaabada caafimaadka, iyo macluumaadka amniga oo faahfaahsan.

Dowlada Australiya waxay rajeyneysaa inay bilawdo talaalka kooxaha mudnaanta sare leh ee Australiya laga bilaabo bartamaha ilaa dabayaaqada Febwari.

Shaqadayada TGA waa inaan u xaqiijino dadka Australiyaanka ah in talaaladan ay nabdoon yihiin, wax ku ool yihiin oo ay buuxiyeen heerarkeena adag.

Waxaa qoray Adjunct Professor John Skerritt, oo hogaamiya Maamulka Agabka Daaweynta.